
U heeggan Iswiidhan
Caddaalad badan






# Iswiidhan oo *dedaalku* midho dhaliyo, faldambina ciqaab lagu mutaysto, bulshaduna ku garab istaagto markaad taageero u baahato.

**Mushaharka oo lacagi kaaga soo hadho. Qoyska iyo waqtiga firaaqada oo siyaado hela.**

Xisbiga Moderaterna cashuurta shaqada ayuu dhimayaa si shaqayntu u faa'iido badato

- Waxaannu 5,000 kronor oo cashuur ah bishii ka dhinnay qoyska caadiga ah ee carruurta leh - waxaanannu rabnaa inaan intaa in le'eg hoos u dhigno
- Gunnada hawlgabka oo loo xoojiyo qofka
- noloshiisa shaqo oo dhan shaqaynayay
- Siyaasad kaalmo (bidrag) oo adag iyo kaalmada oo saqaf leh – shaqayntu inay faaiido badnaato, khiyaanada iyo ku-takrifalka oo la joojiyo

**Dembiilayaasha waa in xabsi la dhigaa si aad dibedda u joogi karto.**

Waxaannu garab taagannahay dhibbanayaasha, joojineynaa rabshadaha gaangiska, oo cunaqabataynaynaa dhaqaalaha dambiilayaasha.

- Toogashooyinka dil ayaa kala badh noqday, dambiilayaasha aan muwaadiniinta Iswiidhishka ahayna waa la masaafurinayaa.
- Booliis iyo kamarado badan – ciqaabo ka adag iyo joojinta fududaynta xukunka faldambiyeedyo wadareedka
- Joojinta duufsadka carruurta ee gaangiska iyo cunaqabataynta dhaqaalaha dambiilayaasha
- Ragga dumarka rabshadeeya waxa loo qaban sida rabshadaha gaangiska



# Shilin kasta oo *cashuur lagu takri-falaa* wuxuu ka go'ayaa daryeelka, dugsiga iyo amniga.

**Daryeel aad ku kalsoonaan karto.**
**Oo aanad sugin.**

Waxaad heli doontaa daryeelka aad u baahan tahay iyo waqtiga saxda ah. Waa qayb ka mid ah heshiiska bulsho.

- Waxaanu sannad kasta kordhinnay maalgelinta samafalka - sidaas ayaanay ku sii socon doontaa.
- Daryeel bixiyeyaasha jebiya dammaanadda daryeelku waa inay bixiyaan magdhow.
- Daryeel 30 maalmood gudahood - iyo daryeel magaalo kale haddii sugitaanku aad u dheer yahay
- Shuruudaha luqadeed ee daryeelka waayeelka
- Qiimaha daryeelka ilkaha oo dadka waaweyn loo jebiyo

**Dhaqaale xooggan.**
**Shaqooyin badan.**

Dhaqaale xooggan oo keliya ayaa qaadi kara daryeelka bulsho ee mustaqbalka.

- Iswiidhan waa inay toban sano gudahood lahaataa heerka nololeed ee ugu sarreeya EU
- Fursado shaqo badan ee shirkado badan - cashuur yar iyo sharciyo fudud
- Nidaam dhaqaale - maaliyad dawladeed oo xooggan iyo masuuliyad lacagta cashuurta
- Maalgalin weyn oo ah difaaca, tamar nukliyeer, kaabayaal dhaqaale, dugsi iyo daryeel

Ka akhriso wax dheeraad ah oo ku saabsan siyaasaddayada bogga moderaterna.se

# Wax qabad ayaannu muujinnaa
*– waxaana jira wax badan oo la qaban karo*

Awoodda Iswiidhen waa heshiiska damaanad ee bulsheed. In qofka waajibaadkiisa gutaa ogaado in bulshadu taageerayso markuu u baahdo. Laakiin heshiiska bulsheed waxa ku dhacay dildilaac. Waxaad dareemi kartaa markaad shaqo ku dhididayso ee haddana mushaharku kugu fillaan waayo, marka dambiilayaashu dadka kale ku dul nool yihiin iyo marka qof noloshiisa dhan shaqaynayay uu qalitaan caafimaad bilo dhan sugayo. Sidani caddaalad ma aha. Waana taas waxa aannu wax ka qabannay.

## Iswiidhan waddo sax ah ayay ku socotaa - waxay ka muuqataa nolol maalmeedkaaga

**Ilaa iyo markii xisbiga Moderaterna uu xukunka qabtay:**

- Cashuur dhimitaan – qoyska carruurta leh waxa laga dhimay SEK 5,000 oo dheeraad ah bishiiba
- Lammaanaha hawlgabka ah waxa laga dhimay SEK 2,200 oo dheeraad ah bishiiba
- Gaangistarrada aan muwaadiniinta Iswiidhishka ahayn oo la masaafuriyo.
- Dilalka toogashooyin oo kalabadh hoos u dhacay iyo boolis badan oo shaqo dibadeed ku jira.
- Dhimitaanka cashuurta cuntada, korontada, shidaalka iyo ISK
- Sugitaanka daryeelka caafimaad oo 30% yaraaday (marka laga reebo Stockholm, oo xisbiga S maamulo)
- Hirgelinnay shuruudaha luqadeed ee daryeelka waayeelka
- Iswiidhan oo xubin buuxda ka ah NATO

## Hawshayadu may dhammaan

Hadafka xisbiga Moderaterna waa in toban sano gudahood heerka nolosha ee Iswiidhan uu noqdo ka ugu sarreeya EU:da - dal dedaalku uu midho dhaliyo, rabshadaha gaangiska la tirtiro oo dugsi iyo daryeel caafimaad shaqeeyaan.

Ma rabtaa in Iswiidhan ay horumar ku sii socoto?

**U codee xisbiga Moderaterna bisha Sebtembar 13keeda.**

> *Dadaalku waa inuu midho dhaliyaa. Faldembi waa in ciqaab lagu mutaystaa.*
>
> Ulf Kristersson, ra'iisul wasaaraha iyo hoggaamiyaha xisbiga Moderaterna.

**Ma rabtaa inaad ku lug yeelato Iswiidhan caddaalad ah?**

Maanta xubin ka noqo oo bixi 100 SEK. Iskaan garee QR-ko-odhka ama booqo: moderaterna.se/medlem